




Utility Customer Service  
700 5th Avenue, Suite 2777  
P.O. Box 34027  
Seattle WA 98124-4027

PRSR STD  
U.S. POSTAGE  
PAID  
SEATTLE, WA  
PERMIT NO. 5130



Greg Nickels  
Duqa Magaalada Seattle



## Welcome to Your New Home Information for Seattle Utility Customers

Printed on recycled paper 93190 7/2007  
Somali

Buug gacmeedkan waxaa kuu soo gudbisay Seattle City Light, shirkadda quwadda korontada iyo Seattle Public Utilities (SPU), shirkadda biyaha, qashin qaadka. Wxaad inoogu tashan kartaa in aan kharashka ugu yar kuugu qabanno adeegyo bey'adda ku habboon.

Adeegga Macaamilka .....(206) 684-3000  
(TTY, dadka maqalka & hadalka ka itaal darran).....(206) 233-7241  
Taleefoonnada dibedda laga waco .....(800) 862-1181

Isniinta-Jimcaha 7:30 sub.-6 gal.  
Wxaad inagala soo xiriirtaa dhamaan waxyaabaha la xiriira xisaabtaada, macluumaadka guud ee korontada, biyaha qashin qaadka iyo dibu warshadeeynta iyo in aad wax ka weydiiso kala go'a ku meel gaarka ah ee korontada. Wxaad helaysaa adeegyada turjubaanka.

Adeegyada Degdegga ah  
Xaaladaha Degdegga ah ee ka baxsan saacadaha caadiga ah ... (206) 706-0051  
[www.seattle.gov/light/neighborhoods](http://www.seattle.gov/light/neighborhoods)  
Biyaha, Adeegyada Furitaanka Dhumanka Qashinka Qaada .....(206) 386-1800

Barnaamijada Gargaarka .....(206) 684-3000  
[www.seattle.gov/humanservices/csd/utilityassistance](http://www.seattle.gov/humanservices/csd/utilityassistance)  
Dhawr fursadood ayaa u furan waayeeelka, dadka naafada ah, iyo dadka dakhliga yar ee ka dhibaateysan bixinta kharashyada biilasha. Guud ahaan, waxaa la tixraacaa shuruudo dakhliga la xiriira.

Adeegyada Otomaatika ah (24-ka saac)  
Furitaanka ama Xiritaanka Xisaabtaada.....(206) 684-4969  
[www2.cityofseattle.net/util/services/closeopen/a.asp](http://www2.cityofseattle.net/util/services/closeopen/a.asp)  
Soo Wargelinta Qashinka Aan la Qaadin Gudaha/Qashinka Dibedda/Qashinka Dib Loo Warshadeeyo .....(206) 684-3000  
[www.seattle.gov/util/services/garbage](http://www.seattle.gov/util/services/garbage)

Habka Otomaatika ah ee Biilasha Loo Bixiyo .....(206) 733-9100  
[www2.cityofseattle.net/html/citizen/ach/](http://www2.cityofseattle.net/html/citizen/ach/)  
Dhammaan biilasha City of Seattle waxaa si otomaatik ah looga bixin karaa xisaabtaada socota ee bangiga. Macaamiisha waxay adeeggaan ku dalban karaan internetka ama iyagoo soo buuxiya foomka internetka kaddibna ay u soo diraan oggolaashada daabacan:  
Seattle City Light, Account Control  
700 5th Ave, Suite 3200, PO Box 34023  
Seattle, WA 98124-4023

Macluumaadka Biilasha .....(206) 684-3000

[www.seattle.gov/light/accounts](http://www.seattle.gov/light/accounts)  
[www.seattle.gov/util/services/billing](http://www.seattle.gov/util/services/billing)

Wxaad heli doontaa biilal kala gaar ah ama iyagoo mid ah, mar labadii billoodba. Kharashyada waa ay kala duwanaanayaan iyadoo ay ku xiran yihiin tirada dadka guriga ku nool, dhawritaanka isticmaalka, nooca kuleyliska, iwm. Waxaa la og-gol yahay in biilasha lagu bixiyo xaggaa internetka, taleefoonka iyo dhamaan meelaha laga bixiyo iyadoo la isticmaalayo kaararka amaahda iyo kuwa xisaabta bangiga. Macaamiisha waa ay soo diri karaan lacagta ama waxay shaqsi ahaan u keeni karaan goobaha ku qoran biilkaaga xaggiisa dambe. Si dhaqsi ah inoo soo wac haddii ay wax ka qaldan yihiin biilkilamaa haddii aadan ku bixin karin waqtiga la doonayo. Macluumaadka ku saabsan qimaha, kharashyada iyo nidaamka wxaad ka helaysaa internetka iyo adiga oo codsatid.

### Nidaamka Biilasha ee Seattle City Light

City Light waxay hoos timaadaa dawladda hoose iyadoo uu sharciga Washington qabo, in aan lagaa saamixi karin kharashyada korontada gurigaaga la soo gaarsi-iyey. Waxay tani la mid noqonaysaa iyadoo haddiyad laguu sijiyey miisaaniyadda dadweynaha. Marka adeegga la joojiyo iyadoo biilasha la bixin waayo, City Light waxaa laga doonayaa in ay soo xareeyaana lacagtada dhammaanteeda inta aan adeegga dib loo furin. Waxaa xal kale noqon kara iyadoo boqolkiiba 50 la bixiyo islamarkaana heshiis lagu qanacsan yahay laga gaaro inta harsan oo idil.

Marka uu isbeddel ku yimaad degganaanta iyo/ama lahaanshada hantida, milkiileyaasha iyo degganeyaasha si wadajir ah ayeey mas'uul uga yihiin in ay kula soo socodsiiyan City Light toban ah maalmaha la shaqeeyo gudahooda. Haddii kale, milkiilaha aaya suuragal ah in loo diro biilka kharashyada ay galeen degganeyaasha iyo/ama milkiileyaashii hore, xittaa haddii uu biilkilaha ayaal magaca degganaha, ama milkiiliihii hore.

Dhammaan dadka weyn ee ku nool guriga waxay mas'uul ka wada yihiin bixinta biilasha korontada. Wxaana ka mid ah xaaska, qofka ay nolosha kala dhaxeyso, iyo kuwa ay la deggan yihiin, xittaa haddii aysan ku qorneyn dalabka adeegga korontada.

Qorshaha Miisaaniyadda Biilasha .....(206) 684-3345  
[www.seattle.gov/light/accounts/assistance](http://www.seattle.gov/light/accounts/assistance)  
Guryaha iyo macaamiisha yar ee adeegyada guud oo haraaga xisaabtooda aysan ka badneyn \$100. City Light waxay si isla-eg u xisaabisaa kharashyada sanadkii hore kaddibna xisaabtaasi u qaybinaysa 12 billood. Sanad waliba ayaa xisaabtani la sameeyaa.

# Macluumaadka Macaamiisha Seattle Utility

**Inta Aadan Qodin Waxaad Soo Wacdaa** .....1-800-424-5555  
[www.callbeforeyoudig.org](http://www.callbeforeyoudig.org)  
Inta aadan qoditaanka billaabbin, waxaad soo wacdaa labo ah maalmaha la shaqeeyo ka hor.



**Adeegyada iyo Macluumaadka Dhawritaanka Isticmaalka**  
Seattle City Light .....(206) 684-3800  
Seattle Public Utilities .....(206) 684-SAVE (7283)  
[www.seattle.gov/light/conserve/resident](http://www.seattle.gov/light/conserve/resident)  
[www.savingwater.org](http://www.savingwater.org)  
Waxaannu haynaa barnaamijyo iyo macluumaad dhowr ah ee kaa caawiwaya dhimista kharashyadaada biilasha. Soo wac ama booqo boggayaga ee internetka.

## Adeegyada Korontada

(Cinwaanada waqooyi ka xiga Denny Way).....(206) 615-0600  
(Cinwaanada koofur ka xiga Denny Way).....(206) 386-4200  
[www.seattle.gov/light/contractors/esc](http://www.seattle.gov/light/contractors/esc)  
Hore u soo wac haddii aad dooneysid macluumaadku ku saabsan rakibaadda adeegga korontada ama kala go'a ku meel gaarka ah. Macaamiisha waxay codsan karaan "Shuruudaha ku Saabsan Rakibaadda Adeegga Korontada," ama waxaad buug gacmeedkan ka helaysaa internetka.



Ka Hortagga Biyaha Wasakhooba .....(206) 684-7587

## Isticmaalka Shidaalka

[www.seattle.gov/light/FuelMix/](http://www.seattle.gov/light/FuelMix/)  
Sharciga Gobolka Washington wuxuu doonayaa in ay hay'adaha u sheegaan macaamiishoooda sida loo soo saaro korontada. Noocyada shidaalka ee soo socda ayaa la isticmaalay si loo soo saaro korontada ay City Light qaybisay 2006: Biyaha 89.8%, Nuukliyarka 4.6%, Dabeysha 3.5%, Gaaska Dabiiciga ah 1.1%, Dhuxusha .9%, Wax Kale .1%

**Adeegyada Qashinka** .....(206) 684-3000  
[www.seattle.gov/util/services/garbage](http://www.seattle.gov/util/services/garbage)

Weelasha qashinka waa in ay dawladda hoose bixisa. Qiimaha bishii ee qashinka dibedda waxay ku saleysan yihiin cabbirkira weelka. Haddii wellkaaga qashinka uu aad u culus yahay, lama qaadi doono. (tus., wellka qaada 32-gaalan xadkiisu waa 60-rodol.) Shey kasta ee buux dhaafiyaa xadka uu weelka ku xirmo waxaa laga qaadaya \$5.60. Weelasha ay ku jiraan in ka badan 10% waxyaabaha dib loo warshadeeyo lama qaadi doono. Soo wac si lagaaga beddelo weelasha ay waxyeelladu gaartay ama kuwa maqan.

**Soo Wargelinta Qashinka Aan la Qaadin** .....(206) 684-3000  
Waxaad soo sheegtaa marka aan waqtigooda la qaadin qashinka, qashinka dib loo warshadeeyo iyo qashinka dibedda wixii ka dambeey 6-da galabnimo ee maalinta aan la qaadin ama 6-da galabnimo ee laba ah maalmaha la shaqeeyo gudahooda. Haddii ay hawada ishortaagto qaadista qashinka, waxaannu maalinta caadiga ah ee xigta qaadeynaa laba xamuul in u dhiganta iyadoo aan lacag dheeraad ah lagaa qaadi doonin.

**Xarumaha Qubista & Qashinka Dibu Warshadeeynta** .....(206) 684-8400  
[www.seattle.gov/util/Services/Garbage/Recycling\\_&\\_Disposal\\_Stations/](http://www.seattle.gov/util/Services/Garbage/Recycling_&_Disposal_Stations/)  
Saacadaha 8 sub. - 5:30 gal., maalin kasta  
Xarunta Waqooyi: 1350 North 34th Street  
Xarunta Koonfureed: 8105 5th Avenue South

**Cagaarka iyo Tamarta Dib Loo Cusboonaysiyo** .....(206) 684-3000  
[www.greenupseattle.org](http://www.greenupseattle.org)  
Macaamiisha City Light waxay xulan karaan in ay bixiyaan \$3, \$6 ama \$12 oo dheeraad ah bishii si ay u iibsadaan tamarta dib loo cusboonaysiyo ee cusub. Xulashadaada tamarta ha barbar socoto waxyaabaha aad qiimeyo. Waxaad taageertaa tamar nadiif ah iyo bey'ad caafimaad leh.

**Bannaynta Khadka Tamarta/Geedo Jarka** .....(206) 386-1663  
[www.seattle.gov/light/neighborhoods](http://www.seattle.gov/light/neighborhoods)  
Barnaamijkaan waxaa lagu bannaynayaa dhirta u dhaxeysa khadka tamarta iyo filada tobanka cagood ee ugu horreysa ee gurigaaga iyo tiirka-yaga. Macaamiisha ayaa banneynaysa inta harsan.

Ogeysiis: Waxaad helaysaa bug gacmeedkan oo ku qoran luqadaha Isbaanish, Fiyetnaam, Shiinees, Soomaali, Tagalog iyo Kuuryaan. Si laguu caawiyo, waxaad soo wacdaa (206) 684-3000. Waxaad helaysaa dad kuu turjuma.

**Kala Go'a Tamarta** .....(206) 684-7400

[www.seattle.gov/light/neighborhoods](http://www.seattle.gov/light/neighborhoods)  
Kala go'a aan la qorsheynin oo ay keenaan dabeylah, shilalka iyo kharibaadda/burburinta waxaa loo sameeyaa sida ugu dhaqsiyaha badan. Kala go'a qaarkiisa ayaa ah kuwo la qorsheeyey ee lagu dayactiraayo ama horumari-naayo nidaamka jira. Haddii ay dhacdo in aan ku meel gaar ahaan u kala goyno tamartaada, waxaannu aad ugu dadaaleynaa in aan hore kugul socodsiiino.



**Mashruuca Wadaagga** .....(206) 684-3000  
[www.seattle.gov/light/help/share](http://www.seattle.gov/light/help/share)

Mashruuca Wadaagga waa barnaamij ay soo saartay City Light oo lagu maalgeliyo deeqda ay macaamiisha bixiyaan. Waxaa loogu talagalay in mar kaliya xaalad degdeg ahi looga caawiyo bixinta biilk korontada ee macaamiisha dakhligoodu u qalmo. Haddii aad doonaysid in aad wax ugu deeqdid Mashruuca Wadaagga, fadlan soo wac so macluumaad laguu siyo, ama waxaad soo gudbisaa foomka deeqda ee internetka. Deeqda waa mid canshuur dhaafka loo isticmaali karo hase ahaatee looma isticmaali karo xisaabaadka maamulka awadood.



**Barnaamija Qashinka Dib Loo**

**Warshadeeyo** .....(206) 684-3000  
[www.seattle.gov/util/services/recycling](http://www.seattle.gov/util/services/recycling)

Ina soo wac si aad u heshid weelasha qashinka dib loo warshadeeyo ee dibedda laga qaadp. Waxaad inaga caawisaan in aan gaarno bartilmaameedka Duqa Magaalada ee qashinka dib loo warshadeeyo ee boqolkiiba 60.

**Waxaad fadlan ku dartaa qashinka dib loo warshadeeyo:**

- Waraaqaha caadiga ah iyo kuwa boosto lagugu soo diro
- Waraaqaha la jarjaro
- Kaartoona fidsan
- Kaartoonaada caanaha iyo casiirka
- Kaartoonaada cuntada la qaboojiye
- Dhalooyinka iyo weelasha caagga ah (daboolka aan ku jirin)
- Caaggaalaabta caanaha laga sameeyo (oo uu daboolka ku jirin)
- Bacda lagu soo adeegto (bacy-aasha ooh al bac lagu wada rido kaddibna la xiro)
- Gasacyada macdanta iyo alumiinyumka ah
- Birta (kuxiran kaartoonaada cuntada aad loo qaboojiyo; xadku waa 16"x16"x12")
- Dhalooyinka iyo weelasha quraaradda ka sameysan (oo la geliyo weel quraaradaha loogu talagalay)

**Tubooyinka Biyaha Qashinka ah Qaada**

Tubooyinka biyaha qashinka ah qaada waxay biyaha ka soo qaadaan tubooyinka dhismahaaga iyagoo geeyaa xarunta dhexe ee qashinka dadweynaha. Milkiley-aasha waxay ka mas'uul yihiin dayatirkooda iyo hagaajintooda, taasoo noqon karta qaalii oo caadi ahaan aysan qaabilin caymiska milkiliha guriiga. Boqolkiiba 90 dhuumanka qashinka ee xirma waxaa keena dhibaatooyin ka yimaada dhuumanka guryaha ka soo baxa waxaana caadi ahaan hagaajin kara shirkad tuubiiste ee si gaar ah loo leeyahay. Haddii qashinka uu gurigaaga soo gaarayo adigoo aan biyo isticmaalin, waxaad ka soo wacdaa Seattle Public Utilities taleefoonka (206) 386-1800.



**Dalxiiska Skagit: Dalxiiska Diablo Lake iyo Cashada Fiican ee**

**Diablo Dam** .....(206) 684-3030  
[www.SkagitTours.com](http://www.SkagitTours.com)

City Light waxay qabtaan dalxiiska xagaaga ee lagu tago xaruntooda Skagit ee ku taal muuqaalka dabiiciga ah ee Waqooyiga Cascades. Waxaa uu dalxiiska billawadaa ka billawdaa Newhalem, WA, oo qiyastii seddex saacadood u jirtaa.

**Ciladaha Nalalka Dariiqyada** .....(206) 684-7056  
[www.seattle.gov/light/streetlight](http://www.seattle.gov/light/streetlight)

Ciladaha nalalka dariiqyada? Waxaad fadlan inoo soo sheegtaa lambarka tiirka iyo goobta nalalka dariiqaa ee ciladda qaba.

**Si Mutadawcnimo Uga Qayb Qaado Nadiifinta** .....(206) 684-3000

Shakhsiyad, kooxo iyo ganacsyo ayaa qorsheyn kara in ay munaasabad lagu nadiifinaayo xaafadda ama qaban kara barnaamij dariiqyada lagu nadiifinayo. Seattle Public Utilities ayaa bixin doonta qalabka nadaafadda iyo qashinka oo bilaash ah.

**Barnaamija Qashinka Cuntada iyo Dibedda** .....(206) 684-3000  
[www.seattle.gov/util/services/yard](http://www.seattle.gov/util/services/yard)

Adeegga qashinka cuntada iyo dibedda ikhtiyaar ah. Dadka isku qora waxay bixiyaan \$5 oo ah adeegga qashinka dibedda yaal (illaa afar xamuul oo la aruriyo mar labadii asbuucba). Xamuulka dheeraadka ah qiimihiius waa \$1.50 midkiiba. Waxaa la helaysaa oo bilaash ah gaariyada lugaha leh ee qaada 96 gaalan oo qashin. Waxaad qashinka dheeraadka ah ku shubtaa weelasha gacmaha leh (32-gal, 60# qaadkoodu yahay), waraaqaha culus ee alaabta qaado, bacaha polyethylene-ka ka sameysan, ama xirmooyin dun-adag lagu xiro (cabbirkoodu yahay 4'x2'x2').

**Waxaanu qaadi doonaa:**

- Caleemaha, cawska, dhirta la jaro, waxyaabaha jardiinada ka baxa
- Laamaha (ka yar 4 inji dhexoorka iyo 4 cagood dhererka)
- Cuntada la daadsho & waraaqaha cuntada ay qoysay (gaariyada 96-ka gaalan qaado oo kaliya)
- Geedaha ciidaha (dhererka 4-cagood; oo aysan la socon alaabta lagu sharraxo)